# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 34[aad] fadhi 2[aad]** **02/07/2017**

**Ajendaha:-**Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 34[aad]

**Gudoominayay: -** Md. Baashe Maxamed Faarax

**Quraanka** Xildhibaan Xaamud

**Gudoomiyaha:-** Waxaan ku soo dhoweynayaa Mudanayaasha ka dooddaya ajendaha kal-fadhiga 34[aad] waxaan ku soo dhoweynayaa Mudane Axmed Ducaale, ku soo dhawow mudane doodda.

**Md. Axmed Ducaale Bulaale: -** Gudoomiyaha iyo Mudanayaal marka ASC, waxaan ugu horeyn soo jeedinayaa in arrinta Xildhibaanada fadhiga aan imaneyn in la eego.

Waxaan soo jeedinaya in Ajendaha laga saaro saddex Xeer oo kala ah Xeerka Sahminta shidaalka iyo soo saaristiisa, Xeerka Dakhliga Shidaalka iyo Xeerka Macdanta iyo Tamarta, sababtoo ah hawlihii shidaalka iyo macdanta waa la iska wataa iyadoon xeerar loo ansixin macdantii waa la guranayaa, markaa ma jirto sabab aynu Xeerarkaas u ansixino.

**Md. C/qaadir Jaamac Xaamud: -** Marka waan idin salaamayaa, ajendahani aad u fiican yahey oo waa laga soo shaqeeyay, waxaana qabaa Xeerarka la soo jeediyay in laga saaro inay tahey awoodeena inaynu ka gudano oo aan la celin, waxaa jirta in mar walba inagoo ajendihii ku guda jirna ayuu dhamaanayaa oo aan waxba laga qaban, markaa waxaan soo jeedinayaa in laga soo reebo intaynu qaban karono oo aan isleeyahey ha laga dhigo:-

- Xog ogaal u noqoshada Xaalada Dalka
- Xeerka Guud ee Deegaanka
- Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Biyaha
- Xeerka Macdanta oo ah Xeer loo baahan yahey ileyn macdantii dalka way ku jirtaa waana loo baahan yahey Xeerkaas oo lagama maarmaan inaynu celino maahee wixii ka khaldan inaynu saxno
- Xeerka Sahminta Shidaalka waa sidaas oo kale
- Xeerka Dakhliga Shidaalka isna sidoo kale

Waxaan ku soo kordhin oo loo baahan in laga hadlo arrinta Xildhibaanada oo maalin kasta Xildhibaanada qaarna imanayaan qaarna aaney imaneyn oo iska maqnaanayaan dastuurkuna wuxuu sheegayaa in mudanaha 20 fadhi ka maqnaada xubinmada uu

waayo, markaa hadaanu sharcigii shaqeyneyn inaynu wax ka doodnoba maaha, markaa sharciga ha loo noqdo.

**Md. C/laahi Xuseen Cige (Blacky):-** Runtii Ajendahan Golaha la horkeenay waxbadan oo muhiim ahi way ku jiraan waxaanse u soo kala horeysiin lahaa sidaynu u kala gaa-gaabineyno iyo sidey u kala mudan yihiin.

Waan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay in Xeerka Macdanta, Xeerka Sahminta Shidaalka iyo Xeerka Dakhliga Shidaalka saddexdaas Xeerba in laga saaro ajendaha waan la qabaa anigoo ku sababeynaya sababaha Xildhibaankii iga horeeyay sheegay oo shaqeeyaan iyagoonba la inoo keenin oo aynaan ogeyn wixii ay ku shaqeynayeen hadana in Golaha la horkeenaa ma wanaagsana maadaama wakhti kala guura lagu jirno waa arrimo xasaasiyee waxaa fiican in dib loo dhigo.

Waxaan soo jeedin lahaa inaynu muhiimada koowaad ee ajendaha Golaha ka dhigano xog ogaal u noqoshada Xaalada dalka iyo sixir bararka dadka aafeeyeen waliba sideedadaba abaarihii waynu ka sii baxaynaa oo dadkii way ka soo doogteene, laakiin sixir bararkaas ayaa ah wax xadhkaha goostey, markaa ka Gole ahaan waxaan soo jeedinayaa inaynu qodobka kowaad ka dhigano sideynu u ogaan laheyn dhibtan jirta halkey ka imaneyso, cidda wada iyo sida wax looga qaban karo inagoo la kaashaneyna cida wax ka qortey, aqoonyahanka iyo cidda hore cilmi baadhis ugu sameysay.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in sidoo kale ajendaha laga saaro Xeerka ka-hortaga meydhista lacagta oo la raaciyo saddexdaaas Xeer oo hore, waayo waxyaabo badan buu xambaarsan yahey, wax badan oo aynaan hada ka fikireyn baa iman kara markaa Xeerkaasna aynu ka saarno Ajendaha Ayaan soo jeedinayaa, waad-mahadsan tihiin.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal: -** labadii Xildhibaan ee iga horeeyay Axmed iyo Cabdilaahi waxay tilmaameen saddex xeer in lag saaro waxaan ku darayaa Xeerka Maydhista Lacagta waxaan doonayaa in afartaa Xeer laga saaro Ajendaha.

Waxaa la sheegay in Xildhibaano badan maqan yihiin oo hawshodii ay gabeen sababtuna waxa weeye waxaan jirin oo aynana wali ansixin Xeerkii Golaha lagu xukumayay markaa waxaan doonayaa in Xeer-hoosaadkaas qodobka koowaad ee ajendaha laga dhigo.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqdey aan dib loo dhigine la soo hormariyo waayo ileyn markii waynu ansixinaye wixii lagu soo celiyay waa inaynu ogaano oo hadii ay sax tahey iyo hadii kaleba aynu eegnaa. Waxaana ku soo gabagabeynayaa in loo baahan yahey Xeerkii la isku edbin lahaa ee Golahani ku shaqeyn lahaaye ha lagu soo daro ajendaha oo ha loogu soo horeysiiyo. WSC.

**Marwo. Baar Siciid Faarax:-** waxaa la soo jeediyay in 3 xeer laga saaro laakiin anigu waxaan jeedinayaa in 5 arrimood laga saaro oo kala ah

Xeerka Shidaalka, Xeerka Dakhliga Shidaalka, Xeerka Macdanta, Masuuliyiinta Qaranka ansixintooda wakhtigiiba dhamaaye goormaa la ansixinayaa la iska wadaa yaan wax dambe la ansixin iyo sidoo kale in isna laga saaro Xeerka maydhista Lacagta.

Inta kale ajenduhu waa caadi laakiin waxaan u soo kala horumarinayaa in

- Xeerka Sixir bararka oo sixir bararku meel xun buu marayaa korna way u sii socotaa markaa dadkeenii inay bakhtiyaan bay xaaladu ku dhowdaheye aynu ugu soo horeysiino arrinta sixir bararka, WSC.

**Md. Siciid Cilmi Rooble:-** anigu waxaan leeyahey Xeerarka la leeyahey ha laga saaro macquul maaha dee hadii la yidhaahdo Xeerka Macdanta ha laga saaro oo kan shidaalka ha laga saaro dee ileyn waa wixii aad ku xakameyn lahayde maxaynu sameyn, kaneyno ku qoreynaa awoodeenii iyo talaabadii aynu qaadi laheyn, halka aynu ka xakameyn laheyn dadkan wadanka iska guranaya halkan weeye, markaa anigu waxaan soo jeedinayaa inaan Xeerarka laga saarin ee aynu si fiican u darisno oo ku xakameyno xukuumada sharcigan ay dhinac marayaan.

Waan taageersanahey in Sixir bararka kow laga dhigo, waliba ha u qaadanina in la bakhtiyayee kacdoon dadweynaa dhacaya sida caalamka ka dhacda, markaa waxa ugu horeeya ha laga dhigo.

Waxaa jirta Xeer laga saarey meesha oo codeyn uun u baahnaa cid xaq u leh oo aan Golaha aheyn ma jirto Xeerkaasi waa Xeerkii Ganacsiga Bangiga, war Xeerkaasi caalamka oo dhan buu yaalaaye waxa Somaliland sukaha uga dhigay anigu waan ka yaabanahey inagu ma diinteynu si gaar ah u ilaalinaa waa waxaynu sixir bararka ku xakameyn lahayn, markaa hadii la yidhaahdo Xeerarkii shidaalka, macdanta iyo kanba ha laga saaro ileyn waa wixii aynu ku xakameyn lahayn.

Xeerarka Madaxweynuhu soo celiyay wixii dawladu soo celiso xaq baynu u leenahey inaynu u codeyno hadeynu 55 gaadhi weyno sida madaxweynaha yay noqoneysaa, hadaynu gaadhnana teenii baynu ku soo noqonaysaa, markaa Xeerarkaas inta lagu soo celiyay mooyee intaasoo qodob oo dalku u baahan yahey baa ku jira sida kan Xabsiyada, markaa Gudoomiye Xeerarkaas soo dhigoo, hadii ay 55 weyno waa sidaas madaxweynaha hadii kalena waa sideeniiye dee aynu Xeerarka u codeyno ileyn wax kale oo ina hortaag ma jiraane.

Arrinta maqnaashiiyaha Xildhibaanada hadii idaacada laga sheegana way ku qabsanayaan hadii kale ma imanayaan markaa waa in meel kasta laga sheegaa oo la xaadiriyaa oo aad risiqaagii xalaashan weydo waa dhibaato, markaa Gudoomiye talaabo ka qaad adigaa xaq u leh eh, waana ka baxay anigu WSC.

**Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf:-** Gudoomiyaha Mudanayaasha waan salaamayaa, arrinta sixir bararka waxaan leeyahey waxay u baahan tahey waxaynu ku xakameyno,

dawladu maxay ugu amaahan weyday laba boqol oo milyan Imaaraadka ileyn waa inagaa Dekadii iyo Saldhigiiba u ansixinaye labada boqol hadey dawladu ka amaahado way kehelaysaa waxaynu dawladu dhulka ku dhigi laheyd lacagta Bangiga lacagtaa la dhigan lahaa sidaasuun baa sixir bararka lagu yareyn lahaa, markaa waxaan leeyahey dawlada aynu u yeedhno oo nidhaahno maxaad uga amaahan wayday laba boqol oo milyan oo dollar imaaraadka hadii aydaan idinku heysan lacag iyagaa wax ku qabi lahaa, markaa dalku wuxuu u baahan yahey long term loan sixir bararka lagu dejiyo awooda bangigana lagu xoojiyo.

Xeerarka Macdanta iyo shidaalka ee la leeyahey ha laga saaro anigu waxaan leeyahey hadeynu wixii hore weynay intan aynu hagaajino oo aynu ka baaraan degno aynu ansixino ama aynu diidnee, markaa yaan laga saarin baan anigu soo jeedinayaa.

Xeer-hoosaadka aad baynu ugu baahanahey inaynu adkeyno, rag baa lagu eryay oo xubinimadoodii ku waayay markay iman waayeen, waxay ila tahey ninka xildhibaanka ah ee sharafta leh waxaa lagu xukumi karaa wuxuu isagu goosto, lacag ha laga jaro ama si kale ha loo xukume, xaadiriskii baa baaba'ay, markaa waxay ila tahey Xeer-hoosaadka ha lagu soo daro oo inta inoo hadhey aynu shaqada wanaajino.

**Md. Maxamed Saalax Cige: -** bismilaahi raxmaani raxiim, marka hore Gudoomiyaha iyo Mudanayaashaba waan salaamayaa, ajendahan manta inna horyaalaa marka kow laga soo qaado Xeerarka marka laga hadlayo ilaa Xeerka sideedaad sida ajendaha ku qoran waxaa gacanta ku haya gudi, ha noqoto deegaan ama dhaqaale gudi baa gacanta ku heysa oo wali golaha may soo gaadhin.

Markaa Gudoomiye waxaan odhan lahaa Xeerarka Golaha soo gaadhey oo gudiyada ka soo wareegay ayaa ajendaha lagu soo dari karaa kaasaana laga doodi karaa, markaa gudoomiye xeerarkaasi hadey gudiyadu hayaan wax diyaara maaha hadii gudiyadu soo gudbiyeena waa halkeeda oo shir-gudoonka inoo sheegi doona,

Xeerka 11aad ee Xeerka maydhista lacagta, xeerka shirkadaha iyo Xeerarka madaxweynaha ka soo noqdey ayuun baa golaha u yaala, waxaana soo jeedinayaa Xeerka Maydhista lacagaha sidaa mudanayaashu sheegeen baan ku raacsanahey, markaa saddex qodob baa Golaha u yaala, waxaana ku dari lahaa arrinta Xeer-hoosaadka dee horeba golaha waa loo keenay mudanayaashana waa loo qeybiyay, tan maqnaanshaha xildhibaanada gudidda joogtada ayay shaqadeeda tahey ee shir-gudoonka iyo gudidda joogtadu ha iska arkaan, xeer-hoosaadkana hadaan iminka gacanta loo taageyn maxaynu ka keeni oo wax ka badal lagu sameynayn dee sabab golaha loo keeno iima muuqato, hadii sidii Goluhu ku ansixiyay yaheyna dee xeer-hoosaadka shaqeeya ha noqdo, markaa sabab halka loogu soo ceiyo maaha.

Arrinta iminka taagan ee culeyska leh waa arrinta sixir bararka dadkiina aad buu culeys ugu yahey, markaa arrintaas aynu aad u eegno oo gudi aynu u saarno oo si xoog leh aynu

u sameyno oo gudi dabagasha ilaa bangiga aynu dabagalno sababta sixir bararka, waxaana ka soo horjeedaa mar jirto Xeer hore looga saarey sabab loogu soo celiyaa Ajendaha waa Xeerka ganacsiga bangiyada hore ayuu goluhu u joojiyay oo ajendaha looga saarey markaa xeerkaas in la soo celiyona mudanayaashu inay ka hadlaan maaha.

**Md. Maxamed X. Xuseen Ciise: -** Waxaan la qabaa xildhibaanadii iga horeeyay Xeerka Ka hortaga Maydhista lacagaha in laga saaro waayo xeerkaasi ma cada, waxyaabo badan buu huwan yahey markaa hadaanu aheyn xeer waadix ah halaga saaro.

Arrinta xildhibaanada golaha iman waayay waxaan taageersanahey in talaabo laga qaado markaa xeer-hoosaadka hadanau shaqeynayn waa in la horkeeno oo xeer-hoosaadkii u dambeeyay oo Goluhu ansixiyo markaasna ha loo adeegsado sidii xildhibaanadaas loo anshax marin lahaa oo talaabo looga qaadi lahaa.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi: -** aad baa looga wada Hadley waana xaalad taagan waana mid qaran ee maaha mid gaar u ah bangiga sidii xildhibaanadii iga horeeyay sheegeen, waxyaabaha dhaliyayna waynu ognahey oo qaarkood baan ahayn waxaynu inagu gacan ku heyno markaa hadey tahey arrintaas qaran waxay u baahan tahey Golaheena iyo xukuumaduba la iska kaashado oo waxaan la qabaa looyarka in gudi gaar ah loo saaro oo aaney hadal inaga noqone Gudoomiyuhu gudi inaga saar.

Arrinta ku saabsan Abaaraha gudi baa loo saarey oo amergency bay aheyd shaqo badana way qabatey, gudi kale ayaa la sameeyay ka duwan tii hore. Waxaan soo jeedinayaa qodobkaas in laba loo kala saaro kala ah u xogogaal noqoshada xaalada abaaraha iyo qodobka gudidda loo sameeyay horumarinta oo aan anigu qabo in halkan looga yeedho hantida badan inay shaxeynayaan oo golaha u soo gudbiyaan sida looga hawlgalayo, Goluhuna door ku yeesho hawlgalkaas dambe ee horumarinta (development) sida uu noqonayo.

Xeerka Ganacsiga Baananka waxaan ee la yidhi dib ha loo soo celiyo waxaan ku raacsnahey Xildhibaan Maxamed Saalax Xeerkaas ribada ahaa oo dalka qalalaasae galiyay wax faa'iido ahna aaney inoogu jirin waxaan soo jeedinayaa in aan xeerkaa ribada ka hadlayay aan la soo celin waayo wax uu tarayaa ma jirto waxaanan soo jeedinayaa in aan la soo celin hadii seconment aan u helo (waxaanu helay 5 mudane).

Waxaa kale oo aan ka hadlayaa waxaan aad u bixiseen habsanka xildhibaanada, ma dawaynayso in la yidhaa xeer hoosaadka ha la soo celiyo oo kaliya, hada hal qodob ayaan idin siinayaaye u fiirsada bisha 6 deeda waxaa gobolka maroodi jeex ka bilaabmaysa khaad qaadashadii, waxaanu halkan ku oleeyaha 15 xildhibaan togdheerna 15 xildhibaan ama 35xildhibaan  ayay leedahay ahna inta ugu fir fircoon ee golaha timaada, markaa intooda badani waxay tagayaa gobihii oo ay ka hawl galayaan ee markaa ayaynaan meesha canaan uun la soo fadhiyine oo ceebeheena banaanka u saarine. Ma waxaan odhanaynaa ayaan la tagin mise xalkale ayaan haynaa? Waxaa illa haboon in

shirgudoonka iyo gudidda joogtadu xal ka keenaan waxaa la yeelayo ilayn bil ayay maqnaanayaane, aad ayaan idiinku mahadnaqayaa dhagaysigiinii wanaagsanaa.

**Md. Cali Maxamed Aadam (Calibarre):-** bismlilaahi raxmaani raxiim, mudanayaal iyo shirgudoonba waan idin salaamayaa, Ajandaha qodobka 1aad iyo Qodobka 2aad waxaan odhan lahaa sidooda ha loo daayo wanaan baahidii umada waanan qabaa in loo daayo xeerar kale waxaan ka hadlayaa xeerka ka ganacsiga baananka oo sida aan moodayay ku noqday madaxtooyada, hadii aanay shirgudoonku si kale noogu cadayn? Mar hadii uu ku noqoday madaxtooyada kamaba hadli karno hadeer, ee hadii ay xukuumadu soo celiso aan ka hadalno.

Xeerka maydhista lacagaha magaca uu sito iyo waxa uu xanbaarsanyahay isma laha, waxaana ku qoron in lala socdo waxa jeebkaaga ku jira, oo Zaadka aad dirto iyo prepaid-ka laga diwaan galiyo maraykanka iyo engriska. Midakale lacagta la maydhayo iyagaa keenee ma inagaa keenay? Markaa hadii aynaan lagba maydhan maxaan sharciga ugu samaynaynaa? Waxaan soo jeedin lahaa xeerkaa in meesha laga saaro (3 secondmment)

Waxaa kale oo aan ka hadlayaa xeerarka ka soo noqda madaxweynaha waxay maraan sadex marxaladood in aad ku ayido madaxweynaha oo uu sidaa ku ansaxo hadii aad diidana waxaa uu marayaa 2 marxaladood oo kala ah hadii aad 55 u xesho oo uu ku ansaxayo sidii goluhu ku ansixiyay hadaad ku diido wax ka yar 55 xeerku wuu dhimanayaa ee waa in sidaa loo fahmaa, anigu waxaan qabaa waxa halkan inoogu jiraa waa 4 xeer marka laga reebo xeerka law reform commission oo aan anigu sharcid daro u arko 3 kale ha loo daayo oo hadii ay ansaxayaana ha ansexeen hadii ay dhimanayaana ha dhinteene sidooda ha loo daayo ayaan odhan lahaa.

Waxaa kale oo aan ku darayaa xeer cusub oo ah xeerka kala noqoshada xasaanada masuuliyiinta aan ansixino ayaan soo jeedinayaa, waxaa kale oo aan ku darayaa, hadii uu madaxa nabar kaaga dhaco doogtu waa halis, xubnahaa la daawayn karaa lalana da'daalaaye gudoomiyihii waa gudoomiyaha wadani waana Gudoomiyaha Golaha Wakiilada, gudoonkii goluhu wuxuu fuushan yahay laba faras, markaa waxaan leeyahay wadaniyoow kaalaya Golaha hogaamiye ama iskaga taga meesha, WSC.

**Md. Maxamed Cismaan Bulqaas:-** Waan salamayaa shirgudoonka iyo mudanayaashaba waxaan ugu horayn ayidayaa in la gusoo daro xeerka baananka tijaariga ah, xeerka maydhista lacagahana meesha ha laga saaro ayaan soo jeedinayaa, inta kale xeerarka waxaan leeyahay ha ku jiran

Waxaanan kale oo qodobada 1aad 2aad iyo 3aad waxaan galin lahaa qodobo mihiim ah oo dalkuna u baahanyahay loona yeesho cida ay khusayso, waxaana ka mid ah dakadan

maalin walba iska gubanaysa in cida ka masuulka ah loo yeedho oo wax laga weydiiyo cidkasta ha ahaatee. Waxaa kale oo aan leeyahay sixirbararkan iska socda ayaa ka masuul ah waa in la is weydiiyaa oo lacagahan la badalayo go'aan laga soo saaraa.

Waxaa kale oo wadanka ka jira dhulboob baahsan oo gobolada dalka oo dhan saameeyay ee waa in loo yeedhaa Wasiirka Wasaarada Hawlaha Guud (3 secomment) waana in loo yeedhaa oo wax laga weydiiyaa arimahaa dhulkaa la boobayo, waxaa kale oo aan ku soo darayaa in dib u habayn lagu sameeyaa dib u eegis xeerka is-gaadhsiinta ayaan soo jeedinlahaa. Waxaa kale oo aan ku raaxsanahay Calibare xeerkii xasaanad kala noqoshada in la sameeyo waanan ka baxay.

**Md. Maxamuud X. Jaamac Cilmi (Dable):-** Gudoomiye waxyaabaha maanta in haysta ee ugu darani waa abaaro iyo sixirbarar waxaan soo jeedin lahaa oo aan ugu horaysiin lahaa in baanka loo yeedho oo la waydiiyo mushkilada maanta hortaagan, waayo waxa uu yidhi aniga lacagi gacanta iiguma jirto ee waxaa meel ku xidhatay wasaarada maaliyada, markaa si aan arinkaa aan u fahano waa in loo yeedhaa oo la yidhaa inanka bakhaarka haya ayaa maamula suuqa e adiga maxaa kaa qaldan in la yidhaa.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa gudiyadaa abaaraha iyo sixirbararka waa in lagu daraa in baarlamaanka si ay ula shaqeeyaan, waxaa kale oo meesha yaala shuruucda ka soo noqota madaxweynaha waa in loo dhiibaa sharci yaqaan golaha, si uu inoogu sheego wixii sharciga khilaafsan iyo waxaan khilaafsanayn uu inoogu cadeeyo. Waxaa kale oo mihiin ah inuu ka eego ma qodob distooriyaa mise waa qayro distoori.

Waxaa kale oo aan soo jeedinayaa xeerkaa maydhista waa in laga saaraa ajandaha dhamaantii, qodobka shanaad ee sheegaya in ruqsad la siiyay, waayo bangina diinta ayaa diidan midna ruqsada ayaa la siiyay isga oo wax walba samaynaya, cida fasaxdayna waa in laga dabatagaa oo la ogaadaa gudoomiyaha baashe waa Islamic baan oo inaga ayaa ansixinay.

Waxaa kale oo aan ka hadlayaa in shuruuxda ka hadlaya macdanta waa in la keenaa sharcigii uu ku bixiyay markii hore golaha oo waa in looyarka loo dhiibaa waana sharci daree, waa in uu keenaa shuruucdii 8 sano ka hor uu ku fasaxay waananana in maxkamada sidaa lagu geeyaa.

Dhanka maqnaasha waxaan hadba fasaxa la isu siiyaa in lagu baahiyo baraha bulsha iyo tv-yada dhamaantood cida maqnaata bilaa fasax oo meel walba laga sheego lana baafiyo markaa waxaan soo jeedin lahaa Bisha 6 deedana waa la kala tagayaaye waa in go'aan laga gaadhaa waad mahadsan tihiin

**Md. Rashiid Ismaaciil: - A**jandihii hore waxaan soo jeedinayaa in sidii hore logu dhaqmo waxaa kale oo aan leeyahay xeerarkii hore waa in lagu soo daraa ajandaha, waxaa kale oo aan ka hadlayaa doolar la'aani ma jirtee 5 nin ayaa kiciya iyo laba meelood oo la yaqaan ee waa in sidii wax looga qaban lahaa falawgeeda la qaataa ayynan soo jeedinayaa waanan ka baxay.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| **---------------------------------------------------** | **-------------------------------------------** |